

Warbixinta dadka bukaanka ah oo loogu talagalay soo gudbin degdeg ah

Xaashidan warbixinta ah waxaa laguugu sharaxayaa sababta uu Takhtarkaaga Guud (GP) ama takhtarkaaga ilkuhu kuugu soo gudbiyey isbitaalka, waxa ay taasi ka dhigan tahay iyo waxa aad u baahan tahay in aad samayso

Waa maxay sababta aniga si deg-deg ah la iigu soo gudbiyey isbitaalka?

Waxaa si degdeg ah laguugu soo gudbiyey maxaa yeelay Takhtarkaaga Guud ama takhtarkaaga ilkaha ayaa u arka in loo baahan yahay in baaritaan dheeraad ah lagu sameeyo calaamadahaaga cudur, waxa uuna kuu soo gudbiyey takhtar takhasus leh. Waxaa jira cudurro fara badan oo caadi ah oo laga yaabo in calaamadahaas ay ku xiran yihiin, xataa cudurka kansarka ayaa suurogal ah.

Maadaama ay soo gudbintani tahay mid deg-deg ah, waxa ay taasi ka dhigan tahay in lagu siin doono ballan isbitaal muddo laba toddobaad ah gudahood.

Miyay taasi ka dhigan tahay in aan cudurka kansarka qabo?

Marka lagu sameeyo soo gudbinta deg-deg ah taasi si toos ah ugama dhigna in aad cudurka kansarka qabto. Dadka loo sameeyo soo gudbinta deg-deg ah intooda ugu badan ma qabaan cudurka kansarka. Hase yeeshee, waxaa laguugu soo gudbiyey maadaama aad u baahan tahay in aad aragto takhtar takhasus leh ama in dhakhso lagaaga qaado baaritaanno si loogu soo ogaan karo dhibaataada aad qabto.

Haddii ay dhacdo in cudurka kansarka lagaa soo helo, markaa waxa la hubinayaa in cudurka waqti hore la helay si ay suurogal u noqoto in daawayntu ay waxtar dheeraad ah yeelato taas ayayna muhiim u tahay in lagugu arko 2 toddobaad gudahood ka dib marka soo gudbinta la soo diro.

Maxaan anigu u baahan ahay in aan sameeyo?

- Hubi in Takhtarkaaga Guud ama takhtarkaaga ilkuhu uu hayo cinwaankaaga iyo lambarkaaga telefoonka ee sax ah oo uu ku jiro lambarka telefoonka gacanta haddii aad mid leedahay.
- Hubi in aad ballan diyaar u tahay labada toddobaad ee soo socda. Haddii aadan ballan u iman karin labada toddobaad ee soo socda, fadlan u sheeg Takhtarkaaga Guud ama takhtarkaaga ilkaha.
- Haddii aad turjumaan u baahan tahay, fadlan isbitaalka u sheeg ballantaada ka hor.
- Marka aad oggolaato ballantaada deg-deg ah, waxaa muhiim ah in aad u timaaddo, si daryeelkaaga aanan loo daahin ama aanu dib ugu dhicin.
- Haddii aad laba jeer aad u iman weydo ballantaada isbitaalka, waxaa dib laguugu gudbin doonaa Takhtarkaaga Guud ama takhtarkaaga ilkaha. Waxaa taas loo samaynayaa si qof kale ballantaas loo siin karo.

Maxaa xiga ee dhici doona?

Isbitaalka ayaa kuu soo diri doona ballan aad ku heli doonto warqad ama ama telefoon dhowr maalmood gudahood ka dib. Haddii aanad war helin muddo toddobaad ah gudahood ka dib marka aad aragtay Takhtarkaaga Guud ama takhtarkaaga ilkaha fadlan takhtarka

u sheeg in aadan weli ballan helin.

Marka ballantaada lagu siiyo waxaa aad muhiim u ah in aad u timaaddo. Fadlan isbitaalka islamarkaaba u sheeg haddii aadan ballantaada xafidi Karin ama iman karin. Waxa aad ka dib u baahan doontaa in aad dhigato ballan kale.

Maxaa isbitaalka ka dhici doona?

Marka aad u timaaddo ballantaada isbitaalka waxa aad caadi ahaan arki doontaa takhtar takhasus leh oo warbixin dheeraad ah kaa siin doona waxa xiga ee dhici doona. Waxaa weliba laga yaabaa in aad u baahato baaritaanno kuwaas oo takhtarka takhasuska leh iyo Takhtarkaaga Guud ama takhtarkaaga ilkaha ka caawin doona in ay fahmaan waxa keenaya calaamadahaaga cudur. Waxaa hore laguugu sii sheegi doonaa haddii aad u baahan tahay in baaritaanno lagaa qaado muddada ballantaada, fadlan markaa hubi in aad raacdo tilmaamaha ama amarrada hore laguugu siiyo.

Waxaa kuu furan in aad soo kexeysato qof aad saaxiibbo tihiin ama qaraabadaada ah, maxaa yeelay waxaa laga yaabaa in ay taasi ku caawiso haddii aad ka walwal qabto fahmida waxa ay kooxda caafimaadeed kaala hadli doonaan.

Wax su'aalo ah?

Haddii aad wax walaac ah ama su'aalo ah ka qabto soo gudbinta laguugu soo diray isbitaalka, fadlan wac xafiiska Takhtarka Guud ama takhtarka ilkaha si aad ula hadasho qofka ku soo gudbiyey.